Laga bilaabo 1.8.2017 waxaa imaan doona isbadal ku saabsan adeegyada loo qabto dadka shaqo la'aanta ee shaqo doonka ah ee dagan Pirkanmaa

Degmadaada (Tampere, Kangasala, Lempäälä, Nokia, Orivesi, Pirkkala, Punkalaidun, Sastamala, Vesilahti ama Ylöjärvi) ayaa mas'uul ka ah adeegyada shaqaaleysiintaada laga bilaabo 1.8.2017, halkii markii hore shaqadaas uu qaban jiray xafiiska shaqada Pirkanmaa (TE-toimisto).

Kusoodhawaada macmiil ahaan

Warbixin aan ka helnay xafiiska shaqada ee Pirkanmaa waxay tilmaameysaa in aad ku wareegi doonto xafiiska adeegyada shaqaaleysiinta ee meesha aad dagantahay (degmadaada). Isbadalka qaabka adeegga cusub saameyn kuma laha bixinta lacagta shaqqa la`aanta. Si kastaba ha ahaatee, iska hubi in aad xafiiska shaqada u sheegtay shaqo la'aantaada.

Waxaa laguu sameeyey qof shaqaale ah o okaa caawinaya codsigaaga shaqada

Laga bilaabo 1.8.2017 degmadaada waxaa ka heleysaa adeegyo lagu taageeraayo shaqaaleysiintaada iyo qof shaqaale ah oo adiga laguu magacaabay. Qofkaas shaqaalaha ah ayaa kula sameyn doono sahan iyo baaritaan shaqo ku haboon xaaladaada gaarka ah.

Waan kula soo xariireynaa

Xafiiska adeegyada shaqaaleynta bulshada ayaa kula soo xiriiri doona ugu dambeyn 29.9.2017. Diyaar usii noqo xiriirka xafiiska adeega shaqaaleynta kula xiriiri doonaan.

- Waa maxay nooca taageerada aad u baahan tahay shaqo ee raadintaada?
- Waa maxay nooca aqoon cusboonaysiin ee aad u baahan tahay?
- Ma daneyneysaa in aad abuurto ganacsi?
- Waa maxay waxyaabaha kale ee saameyn karo shaqo raadintaada iyo shaqo aqbalaadadaada?

Maxay tahay in aad adigu sameysid?

Haddii aad hore kula heshiisay xafiiska shaqada ee Pirkanmaa sida ballamaha, adeegyada ama howla kale, fadlan xasuuso howshaas in aad u qabato sidii aad ku ballanteen, si lacagta shaqo la'aanta ee aad qaadato hakad ugu imaan. Wixii intaas dheer kala xiriir degmadaada, halkaas oo arimahaaga aad ka xalin doonto mustaqbalka.

Haddii aysan jirin howl ama adeeg aad isku raacdeen xafiiska shaqada oo la dhameystirin, waxaa tartiibtaada u sugtaa in ay kula soo xiriiraan shaqaalaha degmadaada.

Tampereen kaupunki
PL 487, 33101 TAMPERE
Puhelin 03 565 611

kirjaamo@tampere.fi
www.tampere.fi
Y-tunnus 0211675-2

Fadlan iska hubi, sax miyaa macluumaadka lagaala soo xiriiri karo haddii laguu baahdo. Macluumaadkaaga waxaa ka sixi kartaa cinwaanka ah te-palvelut.fi > Oma asiointi.

Oma asiointi -palvelu ayaa sii ahaan doonta kanaalka macaamiisha dibna uga fiirin karaan xogtooda ama ka bedeli kartaa macluumaadkaaga.

Is badalkan yuu quseeyaa?

Isbeddeklka wuxuu khuseeyaa dadka shaqo la'aanta ah, misana shaqo doonka ah ee deggan gobolka Pirkanmaa, kuwaas oo tiradooda lagu qiyaaso 22 000 oo qof. Dhammaan dadkaas waxay xaq u leeyihiin oo ay qaataan lacagta shaqo la'aanta oo ay bixiso Kelada. Macluumaadka macaamiishaan waxaa lagu wareejin doonaa goobta uu daganyahay qofkaas macaamiilka u ahaa xafiiska shaqada. Xilliga kala wareegga (wareejinta macluumaadka) waa bisha 8-aad ee sanadkaan 2017.

Maxay tahay sababta isbeddelkan?

Isbeddelka waa mid la xiriiro tijaabada bilaaban doonta 1.8.2017 ee la xiriirta shaqaalaha iyo adeega shirkadaha ee aag walba. Degmooyinka magaalada, Sastamala iyp Punklaidun waxay kormar ku sameyn doonaan shaqaaleysiinta macaamiisha iyada oo laga eegaayo dhanka qof macaamilka u ah deegaanka.

Isbedel wuxuu ku salaysan yahay sharciga cududa shaqaalaha iyo adeega ganacsiga iyo in qof loo diro shaqo barad si uu qaabka shaqo wax oga fahmo.

Macluumaad dheeraad ah / Information in other languages

Warbixin dheeraad ah waxaad kaheleysaa cinwaanka internedkan:
www.tampere.fi/tyollisyyspalvelut/tyollisyyskokeilu

Su`aalaha oogubadan ee lays weediiyo iyo jawaabahooda waxaad ka heleysaa cinwaankan internedkan: **www.tampere.fi/tyollisyyspalvelut/useinkysyttya**

Warbixin luuqada ingiriiska waxaan kaheleysaa cinwaankan internedka:
www.tampere.fi/localemploymentexperiment

Haddii aad u baahato warbixin dheeraad ah waxaad kaheleysaa magaaladaad laga bilaabo 1.8.2017 ka.

Magaalada Tampere, tal. 040 801 6581 ama 040 8064 127
Magaalada Kangasala, tal. 050 467 2345
Magaalada Lempäälä, tal. (03) 5655 2337
Magaalada Nokia, tal. 040 133 4773
Magaalada Orivesi, tal. 040 133 9270 ama 050 432 2651
Magaalada Pirkkala, tal. 040 133 5796

Magaalada Punkalaidun, tal. 040 631 4026
Magaalada Sastamala, tal. 040 631 4026
Magaalada Vesilahti, tal. 050 570 3220
Magaalada Ylöjärvi, tal. 044 486 0625

Macaamiisha magaalada Tampere su`aalahooda waxaa looga jawaabayaa cinwaanka Sumeliuksenkatu 11, dabaqa 3 aad maalmaha shaqada saacadda 9.00–15.00.

Macluumaadkan waxaad ka heleysaa : Adegidda shaqaysiinta nawaaxiga Magaalada

Waxaa soo diray: MagaaladaTampere

Cinwaanka laga sooxigtay: Xafiiska shaqada diiwaangelinta macaamiisha

Tampereen kaupunki
PL 487, 33101 TAMPERE
Puhelin 03 565 611

kirjaamo@tampere.fi
www.tampere.fi
Y-tunnus 0211675-2